

QORMADA >> SEEYLAC BAALI<<

QEEYBTA 3-AAD.

{qeeybta hore hadii aadan soo aqrisanin ,si aad ula qabsatid sheekadeena ,waxaan ka hadleeynaa wadaad Soomaaliyeed kaasoo noolaay 800 sano kahor .laguna magacaabo ZEEYLICI.
جمال الدين أبو محمد عبد الله بن يوسف بن محمد الزيلعي
Buugaagta oow qoray waxaa kamid ah .
تخريج أحاديث الكشاف 2
نصب الراية لأحاديث الزيلعي.....1
(الكتاب : نصب الراية لأحاديث الهداية)
==========
#Caqiidadiisa ZEEYLICI.
ma soobaarin midaas in oow Ashacari yahay ama MAATURIDIYA ama qolo kale ku caqiido yahay .

koleey qofkii qoraaladiisa badiyo caqiidadiisa waa lasoo helayaa weliba qofka Aayadaha Quraanka qaar kamid ah fasiro
ma qarsoomi karaayo .sheeqa cidoow doono ha ahaado, dan igama gelin arinkaas
Soomaali-nimadiisa ayaan soo baaray kuna dadaalay in aan dadka u cadeeyo midaas.

#CARSHIGA & KURSIGA .
-Adeer CALI WAJIIZ & cidiisa AALA SACUUD
Fool baxsi ayaan udubaahe waxa afkeeyga kasoo fuli doono fajac yeeysan kula noqonin.
-waxba yaanan leeyla yaabin, waxaan jeclahay jirjiroolaha inaan dhaqan kiisa yeesho cida aan metalaayo midabkeeda qaato (maalinba geedkoow daaqayoow midabkeeda qaataa)
qofkaan metelaayo maalintaas gartiisa sida ugu quruxdabadan in aan ugu qaabeeyo ayaan jeclahay. uurkubaale miyaa ma afkeeygoow kalasoobaxay haba dhehee.
-Fuundiga guryaha dhiso ayoow lameel joogaa mufakirka, fikrado badan ayoow dhisaa, mida ugu xigmada badan, qalbigana ku xasilaayo ayoow guri kadhigtaa .
Fuundiga guryo badan ayoow soo dhisay kuwaas oow soo dhisayne midkaan ayoow ka degay isaga ayoowna jeclaaday.
--
Adeer CALI yoow
Fikir ahaan hadii HARAR aan kaala soohadlaayo
Baalcad & Bundubaal qasab waaye .
-maalinta qiyaamo waa la burburin doonaa KURSIGA & CARSHIGA

waxeey noqon doonaan sida Samada & dhulka
[YOOWMA NADHWII SAMAA]
Dadka caarifiinta ah qaar kood ayaa waxeey qabaan sidaas
xitaa waxeey ku dareen JANO & NAAR iyo wixii ku sii dhexjiro
dhamaantood weey iska dhamaan doonaan.
Rabigeen kaligiis ayaa joogi doono sida oow markahoraba kaligiis u joogijiray.
balse aniga waan diiday midaas waayo Jano & Naarba ineey sii jiri doonaan laguna waaraayo NAS ,Quraan ah ayaaba loo hayaa midaas .
Rabigeen makhluuq uma baahna waa run midaas .
-su`aasha marbaad sigtaa jawaabteeda ,siiba mas-alo diinta ku saabsan markeey tahay.
-dhul & Cir , Carshi & Kursi waxaasoo idil waa wada makhluuq
Rabigeena uma baahna waxaasoo idil waa ka maarki karaa.
Jano & Naar safkaas waaba ku jiraan .
Carshigana waa lamid .
[INA ALLAH YUM SIKU SAMA WAT]
sida laga fahmaayo Aayadaas ,Rabigeen Qoraxda ayoow dhulka ku aghaayaa si eey diirimaad inoo siiso Qoraxda .
hadeey qunyar iska dhaqaaqi laheeydna, qar-qaryaa loo dhiman lahaa.
Rabigeen awoodiisa ayoow ku hayaa hadaba, hadhoowna sidoo kale, marka sida sali loo duu-duubee meel leeska dhigo.
hadeerna, far & suul kuma haayo ,Malag baa uxilsaaran hoowshaas, Carshigana uga qiyaas qaado.
- CALI WAJIIZ
sida dad xidid ah hadii leesku xaqdhoowro
xaqa soo ifbixi maayo .
-Geeleeyda gacmahooda hoosbaa loo dhaqaa.
culimadana mas`alooyinka qarsoon hoosbeey iskula faqaan .

sidaas sax waaye balse Abwaan Dhoodaan ayaa bulshadeena dhex keenay suugaantana kusoo daray.
(gabay. Dhoodaan :Ilaahii Carshiga nuuriyoow)
-asluub u hadalkaad arkeeysid, waa waxeey nagu soo ababsheen ASHAACIRO .
igaar laashin(Laashin = Abwaan) ah oo shirbaayo waxoow yiri
"*Islaamka suuban waa akhlaaq*"
qabyo waaye gabaygaas.
balse dhameestirkiisa waa Aayad Quraan ah .
[WA INAKA LA CALAA KHULU QIN CADIM]

[LAQAD KAANA LAKUN FII RASUULI LAAHI US WATUN XASANATUN]
ku deyasho Rasuulkaa mudan , dabciga wanaagan isagaa looga deydaa.

Bulsha yahay su`aal.?
Reer Gedo weey fool-baxsadaan ma run baa?
waxaan is weeydiiyay reer CABUUD WAAQ
ma ka caagan yihiin Buneeysiga.
-Bulshadeena qaar kamid ah waxa baray Buneeysiga qaarkalana u baran waayeen waa su`aalo qarsoon ,jawaab inloo helana u baahan .
-weeyga su`aale reer CABUUD WAAQ, sumadooda Xoolaha weli sidii miyeey udhigtaan, GEDO miyeey sumad wadaagaan ?.
==========

#Qalinkaad in badan Qadiisa aqrineeysay , cida qortay caqiidadeeda waa Ashaaciro.

==========
==========

#MIINLEEYDA SHEEKADA.
(caqiidadeeyda miinleey.)
marhoraan ka-maray dhaar inaanmaanso tiriyaaye miinleeyda waasheeko maanso loo ekeeysiiyay.
Anigaan macbuudkeeyga Lafo&maqaar maahan
(Tabaraka allaah,axsanalkhaliqin)
Masalana masiisaarna,markalana masoosaarna,mid Malaa`ig sido maahan .Makhluuqaadka gebigoodba mid maciin karabo maahan.

-Macbuudkeeyga Anigaan mid lalamidoobi-karo maahan, iskumilan midkaas sheegay markahoraaba maankaaga makhluuq caabud kaeheeyde, mahwigana adaakeenay,doodeeydaan murankeeda.
-Jibriil & Muxamadkeena mursaliinta gedigood mideey lamidoobi-karayaan maahan.
-meelo badanba,Diinteena Nabigeey amaantaaye,
Misbaaxda & nuurkeeda,waxa eeylameeljoogtay Macbuudkood amaantaaye, ileeskaas,inoo muuqdo waa makhluuqe Illaah maahan.magacyaa naloosheegay sifo muuq-uyeel maahan.
Quraankana kasoobaaro sifo maba naloosheegin .mardanbaa nalookeenay, Quraankeena kuma qeexna Illaah muuqdo sifahiisa.
==========
Miinleeyda 2-aad
(carshiga)
-Aniga maanso maaqaano misbaax-surantay maankeeyga ayaan miinka kahingaadshay.waana sheeko miinleey ah.
Carshigana,maciindoonka,Malagaaxanbaaraayo,moowlaheeyga mabasaarna.kursigaa-lameeljoogo.
Makhluuqaadka gedigoodba moowlaheena umabaahna
(idaasalka,cibaadii,canii)
mid dhawaansho lagusheegay kacbadow mushaaxaahe ukaalaya miyoowsheegay kii Keenya kadhawaaqay
==========
#Miinleeyda,3-aad.
-Anigaan macbuudkeeyga

Miskiga udgoon maahan sida Timir macaanmaahan humaaga&muuqaalka intamaanka sawirtoodhan moowlaheeyga kaas maahan.
-Muruq&awoodeeyda intaan miinka kahingaadshay mahadeeda Rabigaa leh.
-ma lulmoodo manaliico inta hurdo masootooso.
-Quraan waaye masxafkeena,isagana makhluuq waaye.
(waa makhluuq kitaabkeena)
Hadaad muran kakeentana maxaa maktabada iisaaray?.
marka moowdka ihaleelo aakhiro markaanjoogo Albaqraa imaaneeyso,igu Sawir hajoogtee Alcimraan agjoogsaday Ilaah maan agjoogaa .
Quraan iimaciinaayo Sida Nabiga soow maahan.
In makhluuq Kitaabyahay Bukhaaraa marhore qiray.ana waan kameersaday.
-miinleeyda aantiriyay horay-maanan uaqoonin .
Muuqmaleh macbuudkeeyga.
Muuqlaay hawana maahan.
Nabi Muxamad udgoonkiisa miskigoow lameeljoogay.
intasoo`udgoontiyo,intakalee,udgoonlaay
ILLAAHEENA saasmaahan.
--
Moowduucaan caqiidada marhoraa aqiinay,Waamiraha toowxiidka Balse MIINKA SHEEKADA weligeey maweeleeyn.

>>DHAMAADKA MIIN LEEYDA <<



==========

#Qoraalka ZEEYLAC-BAALI

SEEYLACBAALI.waa Buug weeyn 500 bog ka kooban hordhac ama muqadimo. gogol dhig ayaan ugu talagalay qeeybtaan,looga hadlaayo Qoomiyada Soomaalida + Oromada + Canfarta.

Buuga SEEYLACBAALI ama ZEEYLACBAALI mudo dheer ayaan qoraayay lagasoo bilaabo 2019 ilaa xiligaan laga soo gaaray 2023.

tifatir ayaa u haray balse qoraal ahaan waa diyaarsan yahay .

Buugaas iyo kii kahoreeyay ee laqoray 2012-2016 magaca ayaa kala duwan balse qoraaga waa isku mid. waana

>>SEEYLACBAALI <<

qormooyin-keena hal dhinac beeyna u wada socdaan,aadna waan usoo gaabiyay qoraalka balse marka Buuga soobaxo wax intaan kabadan ayaad ku arki doontaa.

#Qoraal ahaan Miraha aan sooxigtay.

cida aan inbadan sooxiganaayay waa Miraha Sheeqa , wareeysi oo bixiyay 700 sano kahor .
-Fiqhi ahaan waa fahankeeyga qaaska ah mirahiisana anigaa qoray meel kalana kama soo xiganin.
qoraalkaan waxaa laqoray sanadka 2023.
waana qabyo qeeybo badan ayaa maqan lana qoray 2019.ilaa.2022
==========
#Buug daalacashada waa dalxiis. ([16.12.])
daalacashada Buugaagta waa dalxiis marna waa dad & dal barasho.
Nin dhul mareen ah waxeey dhaayahiis qabteen aanan bulshadiisa usoo tebinin Buugaagna ku daabicin , waa safar qarashkii ku baxay qasaaro laga joogo
Buugaag daalacashadaa lamid ah , waxa kuugu cusub ilhaam ku hel ama qof afka hakaaga sheego ama buug kaba aqri ama maqal & muuqaal ,hadii aadan wax sootebinin , sahan socdaalay oo lagu qasaaray waa adiga.
--
-Hooyo walba markeey ubad dihato ayeey magac ula baxdaa Ilmaheeda qoraa walbana waa sidaas, markoow qoro kitaabka ayoow siiyaa magaca ku haboon .

ZEEYLICIYIIN/SEEYLICI/MAQDASHI/JABARTIYIIN.
waa calankii eey qaateen qorayaashii qalinqabsiga iiga horeeyay qarniyaal horootegay .
waa magaceey dunida kaga caanbexeen SOMALIDA
magaca magaaladaas barakeeysan , Booramaa utaqaan malaha anigana dhinaca Bada ayaan xigsadaa , Calankeena magaciisa waa ZEEYLAC-BAALI.

-siyaasada maalinlaha ah & siyaasiga ka hadalkiisa waa Soor maalin laquuto, qiso maahan qarniyaal la xiiseeyo.
Qabiilka waa kii waarayo balse siyaasiga waa dhimanayaa siyaasadiisana weey la dhimataa hadalkii xiligiisa la tiriyay ee lagu xiiqayna waa la dhintaa.
Qabiilka ,Digil, Daarood & Hawiye , Ciise & Isaaq ilmo Soomaali dhamaantood weey sii jiri doonaan .Bulshadaas Rabi dhaxalka usiiyay in eey siijoogaan dunidaan in aan ka faaloodo, dhaqankooda Islaamnimo ee quruxda badan ayaan jecleestay.
iyagaas inaan maalgashado ayaan jecleestay .
-maqaalkaan dhexdiida siyaasiyiin ayaan soo hadalqaaday , qabiilo ayaan magacooda falanqeeyay.
Buuga soo bixi doono ee baalashiisa aadka u badanyihiin waxaas waa ka mamnuuc waan ka masaxayaa buugaas baalashiisa.
waa hadii eey dhibsadaan Qabiilka in magacooda lasoo hadalqaado.Boqorada & Malaaqyada & madaxda dhaqanka taladooda midkii tixgelin siiyo waan ahay .

#WARBAAHINTA SOOMAALIDA.
iyaga ayaa u xilsaaran in eey kasoo waramaan waxyaabaha maanta dhacayo iyagaasna weey kala mad-hab duwan yihiin, kalana midab gedisanyihiin marka laga hadlaayo arimaha ka socdo gudaha somaalida.
waxsheeg maalinle ah iyagaan udaayay .
arimaha caalamkana Al-jaziira ayaan kalsoonida siinay , in eey noosoo tebiyaan .
-hoowl oow hebel qabanaayay kuna filnaaday qabashadeeda , hadii aanan soo hadal qaadin ha igu canaananin in aanan ka hadliwaayay arimaha qaarkood.
==========
==========

#Ilhaamka waa hibo.
ilhaamka waxoow yahay in aan hada kaba hadlo la iima ogola . xiligeeda ayaan ka hadli doonaa soona bandhigi doonaa waxa eey dadka ka yiraahdeen ilhaamka.
==========
==========
#Ceelasha Shidaalka Soomaalida.

Shiilaabo shidaal kii kasoo burqaday ma afkaa shiraac laga saaray?. Nin shidaalhelaanba shido laga deeynine. balkaalay soo eeg Suudaanta Koonfureed ,Gaagaab&dheedheer (nin gaaban& nin dheer)ayaa loo kala qeebshay
-Shaanghaay ayaan shidaalka udoontaa
sadaqo leeygumasiiyo sanuudbaan ka baxshaa ,Shiilaabo inaan kasoo iibsado shidaalka weeyba mudneeyde
Shiraacbaa dulsaarane midka Seeylac kabuuxo inaan soo hadalqaado dantaa iisaamixi weeysay
Saaxil daa hadalkeeda.

==========

#Buugaagta magacyadooda qeeybta hoose kuqoran, kama hadasho arimaha Somaliya hana ku hungoobin raadintooda.
-Buuga SAFARU NAAMA.(qoraha waa Shiico, Calawi ah)kama hadlayo wax Somali quseeyo, mana imaanin geeska afrika.
-AL Yacquubi .buuga AL BULDAAN . kama hadlin arimaha Soomaalida,cagna sooma dhigin ciida barakeeysan ee Bulshada geeska bari.
-Buuga Liiq liiqato waa ku qaldan yahay qoraalkiisa.

waxeey gumeestaha qoreen ayoow soo aqriyay soona xigtay inbadan.xogtaas Buug hebel ayeey ku qorantahay inta oowsan iska dhihin qoraaga waxaa fiican in oow soo aqriyo balse ku kalsoonaanin wax eey dadkale buugtooda ku qoreen.
==========
#layaabkeeyga Jalaala-diin AL-SUYUUDHI.
Jalaala diin C/raxmaan al Suyuudhi.
850 hijriga. ilaa 900 hijriga ayoow noolaa.
(1500 miilaadiga)
xiliyadaas ayoow buugaag qoray kagana waramaayo
arimaha XABASHIDA,buuga magaciisa waa ,AZHAAR AL CURUUSH FII AKHBAAR AL XABUUSH.
sidookale ,buuga magaciisa yahay .RAFCU SHAAN AL XABSHAAN.

Wadaadka waxoow ka waramayaa wanaaga Xabashida leedahay .dabcan isaga Somalida waxeey u xisaab san tahay Xabashi , balse waxaa is weeydiin mudan
maxaa ku kalifaayo wadaadka in oow ka waramo bulsho sooyaalkeeda kana aamuso dagaalada xiligaas ka socday dhulkaan Geeska Afrika?.
800 hijriga dagaalo daran ayaa ka dheceen sida Miqriizi sheegayo Suyuudhina maba soo hadal qaadayo waxyaabahaas.
Masar ayoow kunoolaay wadaadka maalin walba ayaana looga soo safri jiray dhinaca Zeeylac ama dhanka Yaman.
dadka waa deris waa leeska warqabay.
waxa Suyuudhi la`aamusay Miqriizina ka waran siiyay waa wax mudan in Soomaalida is weey diiso.
Miqriizi miyoow uga aqoon badan yahay arimaha Soomaalida Suyuudhi.
culimo Seeyliciyiin ah ayaaba wax soo bareen Suyuudhi, sidee ayoow u aqoon kari waayay xaalada Zeeylac ku sugantahay.

==========
==========
#DAAROOD Qabiil mise Qaran beey ahaayeen?.

JABARTI.

Yaa Jabarti looyaqaanaa maanta?.
DAAROOD ISMAACIIL JABARTI.
waagiisa hore waxoow ahaay DAAROOD, JABARTI.
xiligaan danbe ayeey kusoo kordhiyeen Ismaaciil.

JABARTI. magacaas waxoow metelaa bulsho Muslim ah degan geeska afrika.qof Jabarti ah ayaad heleeysaa hadana ah Muslim TIGREE ah.

bulshadaas JABARTIYIIN looyaqiinay halkeey degijirtay waa galbeedka ZEEYLAC
dhulkooda ama magaaladooda Webi ayaa maro waana dad fahanka diinta lafaha intoow dhaafay dhuuxa u daadegay.
-JABARTI TIGREE ah
nin Jabarti ah hadana TIGREE ah xagee ku aragtay ?.
hadalka waxaa fiican in aanan leeska dhihin hadii aanan loo heeynin wax daliil ah waxaan ka aqriyay Kitaabka magaciisa yahay "AL JAWAAHIR ALXASAAN FII TAARIIKH AL XABSHAAN"
1360 hijriga markeey eheed ayaana laqoray .
waxaa ku qoran wareeysi oow bixiyay wadaad TIGREE ah Muslimna ah laguna magacaabo , SHEEKH, MAXAMAD AMAAN AL JABARTI AL TIGRAAY AL AZHARI.
wareeysi dheer ayoow bixiyay wadaadkaas waxoowna soo tiriyay gobolada muslimiinta ITOOBIYA. qofkii ubaahan weey ka aqrisan kartaa wareeysigiisa .

-JABARTI SOOMAALI ah Sawirkiisa maku tusiyaa?.
nedka waxaad ka heleeysaa wadaad SHIICO AH, sidoow isaga sheegay. hadii aan hadalka u qurxiyo waa nin AHLU BEED ah, kooxkii kala burburtay ee "MAANDOON " ayoow kamid ahaay.hadeer waa lakala miirmay.wadaadkaas magaciisa waxaa udanbeeyo JABARTI.
-MASAARI JABARTI ah, isagana bal aan kuu tilmaamo.
ninka qoray taariikhda Masarta cusub , nin lagu magacaabo C/RAXMAAN, XASAN, AL JABARTI AL ZEEYLICI .waa qoraaga caanka ah ee Reer Masar
Buug lagu magacaabo "CAJAA IB AL AATHAAR FII AL TARAAJIM WA AL AKHBAAR"
waa nin asal ahaan kasoo jeedo Soomaali.
balse Somali kuma oowsan dhalanin waa Jaaliyada Masar ee Soomaalida ah boqolaal sano halkaas deganeeyd
wadaadkaas meel kale ayaan arimahiisa ku faah-faahindoonaa.
-Mareexaan magac TIGREE wato maantaba aan kuu tilmaamo.
Buuga Futuux al xabash , boga 35.
Qabiilka Mareexaan hogaamiyahooda magaciisa waa sidaan .
XARAABO , JUWEYTAA, TEDROOS.
waxaasoo idil waxeey ku tusinayaan in Qabiilka waayadiisii hore oowsan eheeyn sida oow maanta yahay .sheekada biyadhaceeda Wadaan biyo ka buuxaan aan ka soo daro. waxaan dhihi rabay DAAROOD asal ahaan waa nin Jabarti ah ,Jabartina waa Bulsho Muslim ah oo is uruursatay , cid walba ayaana ka mid ah
sida hadaba kuu muuqatay.
{Aduunka waxaa badan Saaxiib ka wanaagsan axmaq adiga kula dhashay}
==========
Sheekh ZEEYLICI & SALDANDA DAAROOD.

700 oo sano kahor.

Doowlada ugu dadka yar ayeey eheed sida oow sheegay Seeylici.
2000 ayoow ku sheegay ciidamadooda.

#DAAROOD ISMAACIIL JABARTI.
DAAROOD,JABARTI.
sidaas baan ku helnay Boqortooyadaas oow sheegay Sheeq ZEEYLICI
==========
#Zeeylici & magaalada DAROOR.
(DHARAAL AL ISLAAMI)
waa macquul in eey dhisantay
xili danbe isagaba ka danbeeysay , lkn Kutubada
taariikhda weey ka hadlaan siiba kuwii danbe.

-Boqortooyada DAARAD (Daarood) in eey magaceeda ubedeshay DHARAAR AL ISLAAMI waa suuragal iyadana.
qofka aanan aqoonin DAROOR si aan ugu tilmaamo .
Gobolka Ogaadeeniya ama Soomaali galbeed ayeey ka tirsantahay.
-Aqalkii duleelaa layiri waa darrooraa, DAROOR degelkeena weeyaan.

#JABARTI.
dhulka Jabarti ayaa la dhihi jiray sida oow qoray Maqriisi.

==========
#Qalinleeyda danbe & Qoomiyada Daarood ama JABARTI.

DAAROOD.JABARTI
-Buuga ,AL ISLAAM WA AL XABASHA, CABRA AL

TAARIIKH . (qore::fatxi Geyth/bogiisa 110)
faalo dheer ayoow ka bixinayaa JABARTI .
Fatxi waxoow qorayaasha kale kaga fiican yahay mudo 2 Sano ah ayoow deganaay Itoobiya buugaag badan waa nin soo aqriyay xog badan ayoow ku soo uruuriyay buugiisa.xog aadan kaba heleeynin buugaagta kale .1950 xiliyadaas ayoowna qoray Buugiisaas.

JEBARA, JABARTA. ereygaasna waa Xabashi waxaana loolajeedaa,CUBAAD=dadkii cibaadada badnaay.
qoraagaas isagoo hadal kiisa siiwato waxoow leeyahay .
DAWAAROO & Baali waxeey Ku yaaliin dhinaca koonfureed ,qabiilada Sidaamo & Oromada(GAALA) ayaana degan .
magaalada Harar& Baali ayeeyna u dhexeeysaa.
-isla Buugaas boga 150 ,waxoow tilmaamayaa in Axmad Gureey guursaday gabar oow dhalay suldaankii Zeeylac , halka oow kasoo xiganaayo sheekadaasna ma ogi.
sidookale waxaa xiiso leh mamgaalada HARGEEYSA , magac kale ayeey u yaqiineen Carabta waana /JALDIISAA/GALDIISAA
waxoow sheegay in Axmad gureey Ku dhashay meel udhexeeyso HARGEYSA & HARAR.
==========
#Zeeylici & Madaxweeynaha Masar kulan koodii.
Zeylici iyo Suldaan Naasir Al Qalaawoon.
dowlada Masar ninkii xakumaayay xiligaas
ayaa sidaas lagu magacaabi jiray isaga ayeey utageen isagaas ayaana kacodsaday Baadariga Kaniisada Masar in oow ka maslaxo Muslimiinta Geeska dhibka eey Ku hayaan XABASHIDA.
==========
#CUNTADA AMXAARADA.
-JIKADA Amxaarada midbaan ku jeclahay.

Gabar u dhalatay ISAAQ markeey suuqa Seled uqaadato
Daqiiq(Bur) beey soo jimleeysataa , Laxoox(Canjeero) & Kibis(Muufo) ,Sabaayad(Jabaati) beey ka sameeysataa
Waxeey dhahdaa Ubadkaan dhalay baan intaasoo cunto kala nuuc ah uga sameeysan lahaa Burka ama Daqiiqda.
waa markeey usoo adeeg doonato suuqyada caalamka ee laga soo adeegto, sida suuqa Qamadiga Aduunka looga qeeybiyo ee Ruushka ku yaalo.
-Gabadha Amxaarada ah waxeey dhahdaa uma baahni Qamadi oo waxaa dalkeena ka baxo Daafi.(1)
isagaan Canjeero ka sameestaa ,sidaas wiilka Amxaarka ah jeebkiisa lacag ayaa ugu baaqatay lagu soo iibin lahaa Qamadi.
-Gabadha reer Hargeeysa Boorama ayeey beertooda ku taalaa, balse yaa barayo sida loo beerto DAAFI.
-Awoowgeed waa ZEEYLICI waxoow aad ujeclaay DAAFI inoow cuno , Qamadi Ruushka uma doonan jirin
-Shacab wershadii Shamiintada(Sibidhka) ka shaqeeysiin kari la miyaad Daafi beerta kula talisay?.
(Abwaan Laabsaax. sidoow gabay ku sheegay : *Bulshayahay baraaruga*)
-galbeedka Afrikaa naga fiican ,Moos & moxog beey cunaan waxeeyna ku magacaabeen
FUUFUU.
-Nabigaa yiri Rabigeen ha unaxariisto qof awoodiisa ka warhaayo.
dhankale hadii aan udhigno , Rabigeen ha unaxariisto bulsho garatay miraha dhulkeeda kabixi karo inta mirahaas beeratayna iyaga quud ka dhigatay.
dhul beereed hadii oowsan laheeyn gobolkaada, dhagxaanta mishiino ku jejebi, shamiinto ka dhig ee
Soomaalida ka iibi ceeb maahan .
==========

.(1)Zeeylici waxoow yiri Bulshadeena DAAFI ayeey cunaan .
Koonfurta magaalo lagu magacaabo DAAFEED ayaa kutaalo,Dadkeenii hore in eey cuni jireen Daafi ayeeyna daliil utahay midaas .DAAFIT ama Daafeed. Xabashida, Laxooda waxeey dhahaan ANJEERA, koonfurtana CANJEERO.

#Magaca XABASHI sidoow ku baxay?.
waxaan u maleeynayaa in magacaas kayimid cuntada .
waxaa jirto Kibis ama Muufo aad umacaan qaab ahaana uba eg Doolshada ,
Itoobiyaankana magaca eey uyaqaaniin waa "AMBASHA"
ama "HIMBASHA"
aniga weli ma aanan dhedheminin cuntadaas waloow aan ka dhergay Canjeeradooda.markeey faalo ka bixinayaan cuntadaas waxeey dhahaan waa cunto ku dhisan dhaqan diineed
oo marka Ubad naloo dhalo, maalinta ugu horeeyso hal xabo oo Moofa ah ayaa madaxa loo saarayaa waana lagu jejebiyaa sidaas baa dhaqanka yahay. Moofadaas magaceeda waa "AMBASHA"
ama "HIMBASHA.....
-waa aniga iyo ijtihaadkeeygee magaca Xabashi in oow halkaas ka yimid ayaan is tusay, iyagaana iiga aqoon badan qaabka oow magacooda ku baxay ,balse magacaas Carabta uma bixinin mana ahan luqad Carbeed.

SAWIRRADA WAA DALIILKA WAXA AAN KOR KUSOO BANDHIGAY.

الفصل السادس: في بالي

حدّثني هؤلاء الفقهاء: أنَّ هذه المملكة طولُها عشرون يوماً، وعرضها ستة أيام، وعسكرها ثمانية عشر ألف فارس، والرجالة بها كثير عددهم. وأهلها مثل باقي أخواتها في جميع زيّهم وأحوالهم وأقواتهم، والموجودات عندهم، ولكنها أكثر خصباً، وأطيب سكناً، وأبرد هواءً وماء، ولكنَّهم لايتعاملون بالنقود مثل أوفات ولا بالحَكُنة مثل بقية ماتقدّم، ولكن بالأعواض مثل البقر والغنم والقماش.

وهي تلي شرخا. وأهلها حنفية المذهب.

الفصل السابع: في دارة

حدّثنـــي هؤلاء الفقهاء: أنَّ طولها ثلاثة أيام، وعرضها مثلها، وهي أضعف أخواتها حالاً، وأقلّها خيـلاً ورجالاً، وعسكرها لايزيد على ألفي فارس ومثلهم

Adobe Reader - مسالك الأبصار في ممالك الأمصار - ج 4: ممالك اليمن والحبشة والسودان وإفريقيا والمغرب والأندلس وقبائل العرب
File Edit View Document Tools Window Help
38 / 224 100% Find

سكناً، وأبرد هواءً وماء، ولكنَّهم لايتعاملون بالنقود مثل أوفات ولا بالحَكُنة مثل بقية ماتقدّم، ولكن بالأعواض مثل البقر والغنم والقماش.

وهي تلي شرخا. وأهلها حنفية المذهب.

الفصل السابع: في دارة

حدّثنـــي هؤلاء الفقهاء: أنَّ طولها ثلاثة أيام، وعرضها مثلها، وهي أضعف أخواتها حالاً، وأقلّها خيـلاً ورجالاً، وعسكرها لايزيد على ألفي فارس ومثلهم

رجّالة.

وهم في بقية أحوالهم وأحوالها مثل أخواتها ومعاملتها بالأعواض مثل بالي، وهي تليها. وأهلها حنفية المذهب.

/ ٢٤/ هذه جملة ماعلمنا من أحوال هذه المملكة المسلمة في بلاد الحبشة والمملكة منهم في بيوت محفوظة إلاّ بالي اليوم؛ فإنَّ الملك بها صار إلى رجل ليس من

QABIILKA DAAROOD.